

College Bound

SAINT PAUL

Pathways for Every Child,
Family and Future.



Keyd u sii diyaarso mustaqbalka ilmahaaga!

CollegeBound ayaa kugu caawineysa

Magaalada Saint Paul waxa ay u heellan tahay in ay maalgeliso sida ay carruurta guul ku gaari doonto. Ilma kasta oo ku nool kuna dhashay Saint Paul 1-da Jannaayo, 2020 ama ka dib, waxaa loo diyaarinayaa koontada lacagta kuleejka. Carruurta oo dhan koontada lacagta kuleejka waxaa u diyaarinaya Magaalada oo waa barnaamij qeyb ka ah CollegeBound Saint Paul.

Waxa uu ilmahaagu hadda xaq u leeyahay:

- + Koontada lacagta kuleejka oo ay ku jirto \$50 oo ah hadyadda koowaad
- + Hadyad ahaan si loogu caawiyo lacagta keydinta inay u badato
- + Fursadaha carruurnimada hore
- + Macluumaad kaabayaal dhaqaale oo loo hayo qoyska oo dhan

Diiwaangelinta ilmahaaga waa wax fudud!

Intarnetka ayaad ku diiwaangelin kartaa:
www.collegeboundstp.com/enrollment

Miyaad ogeyd?

Carruurta ay qoysaskoodu yihiin kuwa dakhligoodu yahay danyar ama dhexdhexaad ee sameysta koontada lacagta kuleejka, ee gaareysa inta u dhaxeysa \$1 iyo \$ 500:



3 jeer waxay u badan tahay in ay dhigan doonaan kuleej



4 jeer waxay u badan tahay in ay qalin jabin doonaan

CollegeBound

SAINT PAUL

Siyaabaha Ilma Kasta, Qoys, iyo Mustaqbalka

CollegeBound Saint Paul waxaa loogu tala galay in lagu caawiyo bulshada Carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin fursad ay ku horumarin karaan waxbarashadooda dugsiga sare ka dib. CollegeBound Saint Paul waxay qoysaska ku caawineysaa dhisidda aasaas adag oo lagu maalgeliyo waxbarashada mustaqbalka ee carruurtooda.

Bilaabidda lacagta loo keydiyo ilmahaaga waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa marka ay heer kuleej ah gaaraan! Koontada lacagta kuleejku waxay kor u qaadeysaa himilooyinka mustaqbalka, oo waxaa jira xiriir adag oo ka dhexeeya himilooyinka carruurta ee naftooda iyo sida ay waxbarashada ugu dedaalayaan. Barnaamijyada koontada lacagta kuleejka sida CollegeBound Saint Paul waxay gacan ka geysan karaan shucuurta iyo dareenka waalidiinta iyo carruurta.



Su'aalaha La Is-weydiyo Inta Badan

Waa maxay koontada lacagta kuleejka?

Koontada lacagta kuleejka ama CSA waa koonto ah keydin muddo-dheer oo ay qoysasku u isticmaali karaan in ay uga bixiyaan ilmahooda waxbarasha ama tababar xirfadeed dugsiga sare ka dib.

Yaa koontadan xaq u leh?

Dhammaan carruurta ku dhasha kuna sii noolaada Saint Paul 1-da Jannaayo, 2020 ama wixii ka dabmeeya.

Lacagta ma waxaa loo isticmaali karaa kuleejyada iyo jaamacadaha afarta sano oo keliya?

Maya, lacagta waxbarashada waxaa loo isticmaali karaa karaa fursado ah tacliin

kala duwan oo badan, oo ay ku jiraan kuleejyo iyo jaamacado afar sano ah, kuleejyada labada sano, iyo tababar ama xirfado kale oo lagu shaqeysto.

Sidee bay lacagta waxbarashada ugu sii badan kartaa ilmahaaga?

Adiga ayaa lacag joogto ah u gelin kara koontada. Waxaa jira fursado badan oo ay lacagta ilmahaaga ku sii kordhi karto, sida lacago hadyad ah iyo dulsaar.

Sidee baan lacag ugu dhigi karaa koontada ilmahaaga?

Adiga ayaa toos ugu ridi kara intaad aaddo Bremer Bank, ama toos ayaad mushaarkaaga uga soo goyn kartaa,

ama internet ahaan ayaad ugu soo diri kartaa." Waxaa macluumaad dheeraad ah la soo raacin doonaa waraaqaha soo-dhaweynta ah ee aad heli doontid ka dib marka aad ku qorto ilmahaaga.

Miyey jiraan meelo kale oo uu ka socdo barnaamij sidan oo kale ah?"

Haa, barnaamijkan oo la yiraahdo CSA waddanka meelo badan ayuu ka socdaa. Wuxuu barnaamijku ka socdaa magaalooyinka San Francisco, St. Louis, iyo Indiana. Waxaa la sameeyay cilmi-baaris badan oo ah faa'iidada CSA ay u leedahay carruurta iyo qoysaska.

Su'aalo kale miyaad weli ka qabtaa?

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heleysaa:

- CollegeBoundstp.com
- collegebound@ci.stpaul.mn.us
- 651-266-8829
- [f](https://www.facebook.com/collegeboundstp) [@collegeboundstp](https://www.instagram.com/collegeboundstp)

